

fiidhyow, ka tijaabi DVD bilaasha maktabada.

Bilow himilada inta aad kaydsan karto bil kasta, oo sii wad inaad raadcaayn kusamayso waxaad kharash-garaysay si aad u aragto haddii aad gaadhay himiladaadii.

Hababka si loo Bilaabo Kaydsiga iyo Maalgelinta

Waqtiyo badan dadku waxay tixraacaan bilaabida si ay u kaydsadaan ka barasho ahaan “marka hore adigu lacagta isku bixi.”

Waxaad ku bilaabi kartaa waxyar: Qorshaynta xaataat\$10 toddobaadkiiba ama bishiiba waa arin bilaabideedu wayn tahay. Waxay noqon kartaa mid kaacaawin karta qaybta jeeg bixintaada in ay si toosa ugu tagto xisaabta kaydsigaaga;

doorashadan waxaad u kaydsan kartaa si ikhtiyaariya oo waxaa suurto gal ah inaad in kayar ku kharash-garayso caddadka aad ku talo jirto inaad kaydsato.

Loo shaqeeyahaagu ayaa sidoo kale laga yaabaa in uu qaato doorosho si uu u bilaabo kaydsi iyo maalgashi, sida 401(k) qorshayaasha ama u hogaansanaanta ee magdhawga reeban ee kale.

Maktabada Dadweynaha Fargo waxay leedahay qaniimaad aad u tiro badan oo kaa caawinaya inaad barato waxa kusaabsan misaaniyada, maaliyada, kaydsiga iyo maal –gashiga. Booqo barta shabakadayada www.fargolibrary.org/moneysmart ee macluumaadka kusaabsan dhacdooyinka soo-socda ama isku xidhka khadka tooskaa ee qaniimaadka maaliyada ee laga heli karo maktabada. Waxaad kalood ku hakan kartaa Miiska-Macluumaadka Maktabada Weyn ama Maktabada Dr. James Carlson midkood si aad u ogaato hababyow intaa kabadan si aad xariif ugu noqoto lacagtaada.

SAACADAHA

MAKATABADA DADWEYNAHA FARGO

102 3rd St. N. • Fargo
(701) 241.1472

Isniinta -Khamiista 9-9
Jimcaha 11-6
Sabtida 9-6
Axada..... 1-6*

**Maktabada Weyn waxay xidhan tahay maalmaha Axadaha laga bilaabo Maalinta Xuska dadkii u soo shahiiday Maraykanka ilaa Maalinta Shaqaalaha.*

MAKTABADDA DR. JAMES CARLSON

2801 32nd Ave. S. • Fargo
(701) 476.4040

Isniinta -Khamiista 10-8
Jimcaha 11-6
Sabtida 9-6*
Axada..... 1-6

**Maktabadda Dr. James Carlson waxay xidhan tahay Maalinta xuska dadkii u soo shahiiday Maraykanka ilaa Maalinta Shaqaalaha.*

LAANTA NORTHPORT

2714 N. Broadway • Fargo
(701) 476.4026

Isniinta -Khamiista 10-8
Jimcaha 11-6
Sabtida 9-6
Axada..... Xidhan tahay

WWW.FARGOLIBRARY.ORG



XARIIFNIMADA LACAGTA (MONEY SMART)



Ku-bilow Xariifnimo: Gundhiga Misaaniyada

WAXA AY MISAANIYADI QABAN KARTO

Misaaniyada — misaaniyada gaar ahaaneed ama ta qoyskuba— waxay kaa caawinaysaa inaad maareeyso lacagtaada iyadoo gebi ahaanteedba kugu baraarujinaysa halka ay lacagtaadu galayso ama in ay kaa caawiso sidii aad u qorshayn lahayd halka aad **rabto** in ay lacagtaadu gasho.

Misaaniyadu waxay sidoo kale kaa caawin kartaa qorshaynta kharashaadka lagamamaarmaanka ah. Raad raacitaanka kharashaadka iyo ogaanshiyaha waxay yihiin biilasha u baahan in la bixiyo bil kasta, waxaad awoodo kartaa badaniyaa inaad kaydsato lacagta loo baahan yahay. Intaa kadib marka ay tahay in biil ku beegan yahay xilligii la bixin jiray, waxaad awoodi doontaa inaad isticmaasho lacagta aad u qorshaysay ood iska ilaaliso

inaad bixiso xilli danbe lacag lagugu soo dalacay.

Kamadanbaystii, misaaniyadu waxay kaa caawin kartaa sidii aad uga midho dhalin laheyd himilooyinkaaga. Kadib marka sheyada run ahaantii aad u baahan tahay labixiyo, dabadeed waxaad kala door-dooran kartaa waxa kusaabsan sidii aad u kharash-garayn lahayd baaqiqa

lacagtaada. Laga yaabaa in aad go'aan ka gaadho sidii aad u qorshayn lahayd waxoogaa lacag-dhigaala oo leh ujeedo lacageed oo wayn sida iibsi baabuur ama iska bixin waxbarasho halkii aad ka iibsan lahayd shayada aad rabto laakiin aan ahayn run ahaantii kuwa aad aadka ugu baahan tahay.

BILAABID

Talaabada kowaad ee lagu bilaabo misaaniyada waa in la barto halka hadda aad ku kharash-garyso lacagtaada. Waxoogaa yar oo shaqo ayey qaadanaysaa, laakiin raadcaaynta kharashkaaga iyo gadashadaada bishoo dhan (ama in kabadanba) waxa ay kutusi doontaa halka ay hadda lacagtaadu galayso. Waxaa kaliya oo lagaa rabaa inaad haysato buug yar oo xusuus qor ah ama liis ka



kooban qoddobadan macluumaadkaa:

- Taariikhda lacagta lakharash-gareeyey
- Lacag intee leeg ayaa lakharash-gareeyey
- Maxaaa lagu kharash-gareeyey lacagta

Waa arin muhiima in lala socdo dhammaan kharash-graynta oo dhan—xaataa waxoogaa yar oo caddad cabitaanka sida faantada, kookaha eed kala baxayso miishiinka wax lagu gato ama nooliga baskaba. Misaaniyada dhammaan isugaynta waxaad karash-garayso bil kastaba.

Kharashiyaadka badaniyaaba waxaa loo kala soocaa meelaha bilowgaa.

Guryo dejinta: Tan waxaa ku jiri kara kirada qolka ama curaar bixinta, marka lagu daro kharashka isticmaalada sida kulka, korontada, biyaha ama lacagta qashinka.

Cuntada: Marka lagu darayo caddadka aad ku kharash-garayso tukaanka badeecadaha, goobta misaaniyadan sidoo kale waxaa lagu dari karaa kharashka qadooyinka dugsi, cuntooyinka makhaayadaha, ama lacagta lagu kharash-gareeyey cuwaafaha iyo cabitaanada fudfufudud.

Dharka: Marka lagu daro dharka joogtadaa ee dhammaan xubnaha qoyskaaga, xusuuso si aad u ogolaato kharash-garaynta kabaha ama dirayska shaqada.

Gaadiidka: Tan waxaa ku jiri kara kharashka lacag bixinta gaadhiga, shidaalka, caymiska gaadhiga, iyo caddadka miisaaniyadaysan ee dayactirka gaadhiga. Haddii aanad lahayn gaadhi, laga yaabaa inaad u baahato miisaaniyada ee nooliga baska ama kharashaadka kale ee gaadiidka dadweynaha.

Kharashaadka daryeelka Caafimaadka: Haddii aad ku jirto caymis caafimaad, hubi si aad misaaniyad ugu samayso lacagta caymiska joogtadaa ee bilaawe ama lacagta aad kuwada bixiso booqashada dhaqtarka ama rugta caafimaadka. Sidoo kale, xusuuso si aad miisaaniyad ugu samayso kharashaadka waraqada daawada uu dhaqtarku kuu qoro, haddii aad u baahan tahay.

Waxbarashada: Waxaa ku jira halkan kharashaadka lacagta lagu dhigto kuliyaada, lacag bixinta daynta ardayga, lacag iska bixinta buugaagta la akhristo ama saadka dugsi, ama lacagta ka qaybqadashada hawlaha ciyaaraha.

Dayn bixinta: Xusuuso si aad miisaaniyad ugu samayso iska bixinta kaadhahka amaahda ama noocyada kale muddadoodu kooban tahay ee dayn isticmaaluhu galo.

ISBARBAR DHIGA KHARASHKA IYO DAKHLIGA

Islma markaad raadcaayn kusamayso dhammaan kharashaadkaaga oo dhan ugu yaraan muddo hal bila, waxaad arki kartaa halka ay lacagtaadu galayso. Sidoo kale waxaad u baahan doontaa isugaynta dhammaan kharashaadkaaga dhan. Intaa kadib, talaabada ku xigtaa waa inaad eegtid isugaynta dakhligaaga.

- Haddii dakhligaaga bile uu **kaweyn yahay** kharashaadkaaga caadigaa, markaa waxaad ku sugan tahay maqaam wanaagsan si xariifnimo aad ugu bilowdo adigoo kaydsanaya ama maalgashnaya mustaqbalka si aad uga midho dhaliso himilooyinkaaga.
- Haddii dakhligaaga bile uu **kayar yahay** kharashaadkaaga caadigaa, markaa waxaad u baahan tahay si aad u yarayso caddadka lacagta ah eed ku kharash-garayso bil kasta si aad iskuugu dheelitirto miisaaniyadaada.

HABABKA LOO YAREEYO KHARASH-GARAYNTAADA

Talaabada weyn ee hore si loo yareeyo kharash-garayntaada waa adigoo go'aan adag qaata waxaad **ubaahan tahay inaad iibsato** marka la barbardhigo **waxaad rabto si aad u iibsato**. Cunto, hoy, iyo dharka aasaasiga waa baahiyaadka dhabt ah. Bun inaad ka cabto maalin walba



muqaaxida bunka, tagitaanka muqaaxiyaha ama shaneemooyinka, ama u socdaalida tamashlaynta waa arimaha aad rabto inaad samayso.

Fiiri liiska waxaad ku kharash-garaysay lacagtaada bilihii ina dhaafay. Xariijin hoosta ka mari kharashaadkaaga aad gebi ahaantood u baahan tahay si aad ugu darto miisaaniyadaada. Alaabooyinka, isku day si aad u baxdo adigoo ku kharash-garaynanyan alaabooyinka, ama raadi kala doorasho ka kharash yar si aad iyagu badasho. Tusaale ahaan, halkii aad ka bixin lahayd tikidhada fagaaraha shaneemooyinka am kiraysashada